



(utan bilder)

✎ Tessa Welch
🔍 Wiehan de Jager
📄 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 3



Nozibele iyo saddexdii timo

Sagor för barn på svenska

berattelser.se



Nozibele iyo saddexdii timo

Skriven av: Tessa Welch
Illustrerad av: Wiehan de Jager
Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.


Detta verk är licensierat under en Creative Commons Erkännande 3.0 Internasjonal Licens: <https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>



Wakhti dheer ka hor, saddex gabdhood ayaa u baxay inay soo guurtan qoryo.



Waxay ahayd maalin kulul sidaa darteed
waxay aaden webiga si ay ugu soo
dabaashaan. Way cayaaheen waxayna
firahiyeen kuna dabaashaheen biyaha.



Dabadeed eeygii waxuu ogaaday in
Nozibele ay sirtay. Sidaas darteed eeygii
wuu orday oo ku orday wadadi illaa iyo
tuulada. Laakiin walaalaha Nozibele ayaa
halqaas ku sugayay iyagoo uho waaweyn.
Eeygii wuu jeestay oo wuu cararay,
waliigiisna dib looma arag.




Si kadis ah, waxay xaqiiqsadeen in ay yihiin kuwa daahay. Waxay dib ugu soo dagdageen tuulada.




Markii eygii dib u soo laabtay, wuxuu raadiyay Nozibele. “Nozibele, xagee baad joogtaa?” ayuu ku qayliyey. “Waa ikan, sariirta hoosteeda,” ayay tiri tintii ugu horraysay. “Waa ikan, albaabka ka gadaashiisa,” ayay tiri tintii labaad. “Waa ikan, gudaha xerada,” ayay tiri tintii saddexaad.



Markii ay ku dhawaadeen guriga, Nozibele waxay saartay gaceenteeda qoorta. Waxay soo ilowday silsiladeedii! "Fadlan ila laabta!" ayay kabariday saaxiibadeeda. Laakiin saaxiibadeeda waxa ay dhahdeen waa xilli aad u dambe.



Dhahsaba sidaas tuu eeyga u tagay, Nozibele ayaa madaxa ka soosibtay saddex timood. Waxay hal tin dhigtay sariirta hoosteeda, mid kalane albaabka gadaashiisa, midna gudaha xerada. Kadibna waxay u carartay guriga sida ugu dhahsaha badan oo ay awooday.




Sidaas darteed Nozibele ayaa kaligeed dib ku laabatay webiga. Way heshay silsiladeedi waxayna usoo dhaqsatay guriga. Laakiin waxay ku luntay mugdiga.




Maalin kasta waxay ku qasbanayd in ay wax kariso, nadiifiso oo u dhaqdo eeyga. Dabadeedna, maalin aya eeygii yidhi, “Nozibele, maanta waa in aan booqdaa saaxiibo, nadiifi guriga, cuntada kari, oo dhaq alaabta kahor intaan soo laaban.”



Meel fog waxay ka aragtay iftiin ka
imaanayo aqal. Waxay u dhakhsatay
dhinaciisa waxayna garaacday albaabka.



Kadib eeygii wuxuu yidhi, "Sariirta !!
hagaaji!" Nozibele ayaa ku jawaabtay,
"Waliigay marna sarir uma hagaajinin eey."
"Sariirta hagaaji, ama waan ku qaniini
doonaa!" ayuu eeygi yidhi. Sidaas darteed
Nozibele way hagaajisay sariirti.



La yaabkeda, ey aya ka furay albaabka oo ku yidhi, “Maxaad doonaysaa?” “Waan lumay waxaana u baahanahay meel aan seexdo,” ayay Nozibele tidhi. “Soogal, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu yidhi eygi. Sidaas darteed Nozibele way gashay gudaha.



Kadib eeygii wuxuu ku yidhi, “Cunto ii kari!” “Laakiin waligay marna wax uma karrinin eey,” ayay ku jawaabtay. “Kari, ama waan ku qaniini doonaa!” ayuu eeyga yidhi. Sidaas darteed Nozibele waxeey xoogaa cunto ah u karisay eeygii.